



UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **25/02/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- HALAN ELMI SABRIE, Hooyo: Cabdiyo Macallin Dilix, Somali ah, Ku Dhalatay Ceeldheer 01/07/1965-tii, Sidata Warqadda Aqoonsiga Lr.000105025.

LA WAKIISHE:- DAHIR AHMED EGALE, Hooyo: Axado Cilmi Sabriye, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 20/05/1983, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P01580894, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya

TILMAAMAHA DHULKA

Dhul Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Yaaqshiid)**, Cabirka: **(20X30)-M**, Looto No: **017-019-Y**, W.M.L: **(Rep No.24064/2014)**, Tr. 30/01/2014, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamed Cabdulqaadir Sh. Xasan

SOOHDINTA DHULKA

Bari: Dhul No.018-Y & 020-Y, Koonfur: Dhul No.021-Y, Galbeed: **Jid**, Waqooyi: **Jid**

B- Aniga oo ah **HALAN ELMI SABRIE**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **DAHIR AHMED EGALE** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in DAHIR AHMED EGALE awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **DAHIR AHMED EGALE**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay HALAN ELMI SABRIE, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

HALAN ELMI SABRIE

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

DAHIR AHMED EGALE

xalan

Dahir

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- ABDALLA ALI ABDI

2- ALI ABDULLAHI ALI

Abdalla sh

Ali

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1421/T.P.N/25, Tr. 25/02/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **HALAN ELMI SABRIE** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **DAHIR AHMED EGALE** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: C/qani



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 01/03/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **DAAHIR AXMED CIGALE** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1421/T.P.N/25, Tr. 25/02/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

| | |
|-----------------------------|--|
| Magaca La Wakiishaha | DAAHIR AXMED CIGALE |
| La Wakiishay | Dhul |
| Cabirka | 20X30 |
| Ku Yaallo | Muqdisho, Degmada Yaaqshiid |
| Lotto Lambar | 017-019-Y |
| W.M.L | Rep No.24064/2014, Tr. 30/01/2014 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho |
| Taariikhda Wakaalada | 25/02/2025 |

La Wakiishe: Aniga oo ah **DAAHIR AXMED CIGALE**, Leh Tel No. **0615549953**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

DAAHIR AXMED CIGALE